# Macluumaadka bukaanka

Isku diyaarinta Vistaprep iyo Laxabon

Aleris Endoskopi
2/10/2024
aleris.se

Waa muhiim inaad si wanaagsan ugu diyaarsan tahay booqashadaada Si baaritaanka hufan oo natiijo lagu kalsoonaan karo leh loogu fuliyo ayaanu kaa dalbanaynaa inaad si taxadir leh ugu raacdo tilmaamaha.

### Sida ugu dhakhsaha badan ee aad karto

- Ka soo qaado dawooyinka caloosha jilcisa ee warqada dawada laguugu qoray inaad farmasiiga aad doorato ka soo qaadato.
- Rugta caafimaadka la soo xidhiidh haddii lagugu daawaynayo dawo dhiig- khafiifisa ama dawooyinka xinjirowga dhiigga ka-hortagga (aan khusaynin Trombyl).
- Haddii aad macaan/sonkorow qabto dhakhtarkaaga kala hadal wax ku saabsan wax ka bedelaada insulin ee imaan kara oo inta lagu jiro isdiyaarinta si taxadar leh ula soco heerka sonkorta dhiiggaaga.

### Kiniinka birta ha qaadan todobaadkii ugu dambeeyay

Haddii aad kiniinada birta cunto, ayaad u baahan tahay inaad hal todobaad baaritaanka kahor joojiso. Dawooyinka kale ayaad sii wadan kartaa inaad sidii caadiga aheyd biyo yar ugu sii qaadato. Ogow! Laakiin ha qaadan isla wakhtiga aad dawada caloosha jilcisa qaadanayso.

### 2-3 maalmood ka hor baaritaanka

Haddii aad sonkorow qabto, calool ku fadhido ama calool istaag, waxaad qaadan kartaa Movicol ama Lactulos subax iyo fiidkii 2-3 maalmood kahor baaritaanka. Haddii laguu qoray Movicol, waa inaad raacdaa tilmaamaha ku qoran warqadda daawada.

### Maalinta ka horeysa maalinta baadhitaanka

Ka fogow cuntooyinka ay ku jiraan fiber, miraha iyo maqaarka, sida rootiga wada jirka ah, yaanyada, bariiska wada jirka ah, raspberries iyo digirta.

**Waxa ka horeeya ilaa saacada 13.00**
Waxaad cuni kartaa cunto fudud: ciir/caano fadhi, mulawax, beed/ukun, rooti cad.

**Waa ka danbeeya saacada 13.00**
Waa inaad kaliya cabitaan saafi ah cabtaa uun. Tusaale ahaan casiir/saafiga, cabitaanada soodhaha leh, casiirka, casiirka aan midhaha lahayn, maraq, qaxwaha ama shaaha aan caanaha lahayn. Waa in aanad cunto adag cunin ilaa baadhitaanka la sameeyo.

### Daaweynta ku bilaw dawada caloosha jilcisa

Waxa Laxabon ama Vistaprep loo isticmaalaa si mindhicirka loogu faaruqiyo si uu si buuxda ugu banaanaado marka baadhitaanka walamadka laguu sameynaayo. Waxa aad muhiim ugu ah inaad tillaabooyinka raacdo si baadhitaanka loogu sameyn karo. Laxabon ama Vistaprep ha ku qasin dareeraha kale ama waxyalaha wax lagu daro.

### Qofka ay balantiisa baadhitaanku tahay kahor saacada 12:

- Daaweynta bilow inta u dhaxaysa 16 iyo 19 maalinta baadhitaanka kahor:
- 3 bac oo dawada caloosha jilcisa ah ayaa biyo lagu qasayaa. Bac kasta waxa lagu qasayaa 1 litir oo biyo ah. Isku geyn cab 3 litir.
- Bilow tallaabada ugu dambeysa ee daawaynta 5 saacadood ka hor inta aanad rugta caafimaadka tagin: qas oo cab hal bac, tusaale ahaan 1 litir oo dawada caloosha jilcisa, hal saac.

### Qofka ay balantiisa baadhitaanku tahay kadib 12 saacada

- Daaweynta bilow inta u dhaxaysa 16 iyo 18 maalinta baadhitaanka kahor:
- 2 bac oo dawada caloosha jilcisa ah ayaa biyo lagu qasayaa. Bac kasta waxa lagu qasayaa 1 litir oo biyo ah. Isku geyn cab 2 litir.
- Bilow tallaabada ugu dambeysa ee daawaynta 5 saacadood ka hor inta aanad rugta caafimaadka tagin: qas oo cab hal bac, tusaale ahaan 1 litir oo dawada caloosha jilcisa ah laba saacadood gudahood.
- Sii wado cabbista cabitaanka saafiga ah ilaa xilliga baadhitaanka

### Talo!

Waxa fudud in dareeraha la cabbo marka uu qabow yahay. Waxa haboon in la muudmuudsado nacnaca haha leh/afka lagu carfiyo si uu afkaaga u hesho dhadhan fiican.

U dhowow musqusha markaad bilaabayso daaweynta. Si loo ilaaliyo maqaarka ku wareegsan dabada dabada, waxaa lagu saliidayn karaa boomaato dufan leh.

Waxaad sii wadan kartaa qaadashada wixii daawo ah ee kale laakiin ha qaadan isla wakhtiga aad dawada caloosha jilcisa qaadanayso.